



## Hage ku saabsan iibsashada kombuyuutarada ee ardayda

Boggan waxa aanu u samaynay waalidiinta jeclaan lahaa in ay u iibiyaan kombuyuutar gaar u ah ardaygooda.

Hoos waxa ku qoran tusaalayaal ka mid ah waxa Dugsiyada Dadweynaha ee Portland ugu deeqo ardayda. Tusaalayaasha hoos ku xusan dhamaantood waa Chromebook; Si kastaba ha noqotee lagama maarmaan ma aha in ardaydu ay leeyihiin aaladda Chromebook si ay uga qaybgalaan [Waxbarashada Masaafada Fog ee Guriga kusalaysan](#). Koombuyuutarro kale oo badan ayaa ku haboon. Chromebook badanaa waa ikhtiyaar jaban ama rakhiis ah oo dabooli doona ardaygaaga baahidiisa.

### Astaamaha muhiimka ah haddii aad doonayso in aad u iibiso aalad ardaygaaga

- Kamarad hore u soo jeedda oo loogu talo galay shirarka maqal iyo muuqaalka ah
- Sameecadaha ama sameecad loogu talo galay shirarka maqal iyo muuqaalka ah
- Wifi shaqaynaya si uu ugu xidhiidhin karo internetka. (Weli waxa aad u baahan doontaa in aad haysato adeeg internet)
- Ugu yaraan waa in uu 4GB yahay RAM-ku
- Koombuyuutarada leh intel i3, i5, i7, waxa ay ku hayn doonaan muddo dheer, laakiin Celeron ama processors-ka kale ee moobilada sidoo kale waxa ay u oggolaan doonaan ardayda in ay si wax ku ool ah uga qaybqaataan waxbarashada masaafada fog ee PPS-HD
- Ardayda da'da yar waxa aad u baahan tahay in aad tixgeliso shaashad ku shaqaynaysa taabashada iyo maws dibadeed